

Dugsiga Hoose ee Broadwater – La-talinta Rasmiga ah ee Su'aalaha Inta Badan La Isweydiyo (Su'aalaha Inta Badan La Isweydiyo)

Janaayo 2023

Habka wadatashiga

- Maxaa dhacaya inta lagu jiro xilliga wada-tashiga sideese ku hubin doontaa in dhammaan la heli karo?

Habka wada tashiga waa inuu raaca hagiida sharciga. sn ka badan afar todobaad waxaanu la tashaneynaa ardeyda waalidiinta, Barbariyaasha, shaqaalaha dugsiyada maxaliga ah, ururada ganacsiga iyo qeybaha kale ee bulshada.

Waxaa jiri doona habab kala duwan oo wax looga qabto, oo ay ku jiraan onlayn iyo boostada. Wanu tarjumi doonaa dhammaan waxyaabaha khuseeya luqadaha ay ku hadlaan bulshada dugsiyada waxaan fiiri gaar ah siin doonaa waalidiinta iyo daryeelayaasha leh baahiyo dheeri ah si loo hubiyo in codkooda la maqlo inkasta oo marxaladan ka-qaybgalka.

Dhaqaalaha

- Kani ma hindise dhaqaale lagu wadaba?

Waa hamiga golahan si loo hubiyo in baahiyaha carruurta Wandsworth leh SEND lagu daboolo gudaha, iyaga oo ku dhowaynaya qoysaskooda iyo asxaabtooda. Sababo la xiriira kororka tirada carruurta leh EHCPs ee u baahan meelayn dugsi gaar ah, ma dabooli karno baahidooda bulshooyinka dugsiyada deegaanka waxaan ku tiirsannahay meelayn madax-bannaan oo qaali ah oo ka baxsan Wandsworth. Tani waxa ay cadaadis weyn saaraysaa miisaaniyada golaha, saamaynta tanina waa ka yar maalgelinta ay heli karaan dugsiyadeena si ay u taageeraan ka mid noqoshada. Soo jeedintani waxay yaraynaysaa cadaadiskan iyada oo kordhinaysa meelayntayada takhasuska leh ee yaraynaysa ku tiirsanaanta qaybta madaxa banaan, iyada oo sidoo kale taageerta guud ahaan miisaaniyada dugsiyada ee ay saamaysay liiska hoos u dhaca, gaar ahaan kuwa hoose.

Bixinta waxbarashada

- Ilmo kasta oo ay khusayso hindisahan ma heli doonaa boos dugsi deegaanka ah?

Waxaa jira goobo kale oo cayimay oo ay daga karaan dhamaan carruurta. Waxa la filayaa in ay suurtoagal noqon doonto in ilmo kasta boos laga siiyo dugsi ku yaal meel 1mile u jira gurigooda.

Waxaanu abuuri doona oo sameyn doonaa nidaam diiwaan galin si aan u tixgalino dhamaan codsiyada. Waxaan aad ugu dadaali doonaa sidii aan walaalaha u wada ilaalin lahayn oo aan u maarayn lahayn kala-guurka si aan khibrad wanaagsan ugu noqonno carruurta iyo qoysaskooda

Carruurta leh SEND, waxaan si dhow ula shaqeyn doonaa qoyska iyo SENCO si loo hubiyo in bixinta ku habboon la aqoonsado waxaan higsaneynaa inaan walaalo isku heyno.

Carruurta leh shaqaale bulsho oo u baahan gargaar iyo ilaalin, shaqaalhooda bulshadu wuxuu taageeri doonaa kala-guurka shakhsi ahaaneed isagoo tixgelinaya duruufaha qoyskooda gaarka ah.

Saamaynta ay ku yeelan doonto Bulshada

- Sideed u qiimayn doontaa saameynta xidhitaanka dugsiyada ku leedahay bulshada?

Qiimaynta Saamaynta sinnaanta ayaa la sameeyay waxaana lala wadaagay qayb ka mid ah wadatashigan. Tan dib baa loo eegay oo waa la cusboonaysiiyay ka dib jawaabihii la helay wada tashigii hore ee daabacaadda.

Shaqaaale

- Waa maxay taageerada ay heli doonaan shaqaalaha ay khusayso soo jeedintan?

Waxaanu la shaqeyn doonaa badhasaabyada, hogaamiyaasha dugsiga, si aanu u taagero shaqaalaha dugsiga inta aan hawshan ku jirno. Waxaanu la shaqeyn doonaa dhamaan hogaamiyayasha dugsiga Wandsworth si aan u hubino una heysano kartida barista iyo tan kale ee barista ahyen oon kaga faai'daysano dugsigeena bulshada. Waxaa naga hagi doona shaqaalaha ayadoo xidhiidh la leh baahiyahooda laakiin tan waa iney ku jirto CV-gooda, wareysida shaqada si ay mustaqbal shaqo fican u helaan.

Waaladiinta

- Taageero nooce ah ayaa la siinayaa ma diaar u ah waalidiinta waalidinta ay caruurtoodu saameysay soo jeedintan?

Waxaan ku siin doonaa talo iyo tilmaamo ku saabsan boosaska bannaan ee dugsiga iyo hababka oggolaanshaha. Macluumaad dheeraad ah ayaa lagu daray la-tashigan.

Waxaan bixin doonaa taageero dhaqaale oo ku saabsan kharashka unifoorka ardayda dugsiga cusub.

Waxaan turjumi doonaa dhammaan dukumeentiyada khuseeya waxaan bixin doonaa turjubaano sida loogu baahan yahay kullanka jawaab celinta hadalka si ay u sahlanaato fahamka.

Waxaan la shaqayn doonaa kooxda hogaaminta ee Broadwater waxaan fududayn doonaa wada hadalka maamulayaasha maxaliga ah si loo hubiyo in carruurta iyo qoysaska la taageero inta hawshan lagu jiro, wax ka qabashada arin kasta marka ay soo baxaan iyo hubinta in isbeddelka loo maareeyo si hufan oo xasaasi ah. Anagoo adeegsanayna kooxda shaqaalaha, waxaan si joogto ah u raadineynaa ra'yiga, rabitaanka iyo dareenka ardayda si aan ugu sheegno xirmada taageerada ee la bixinayo.

Waxan si dhow ula shaqaynayaan dugsiga si looga wada hadlo qorshayaasha kala-guurka iyo sida macluumaadka loo gudbiyo, kaas oo lagu wargeliyo baahiyaha carruurta iyo qoysaska si joogto ah.